**Dhacdada Cimilada ee loo yaqaan El Niño, waxay u badan tahay inay keeni doonto roobab xoog leh oo la filayo inay ka dhacaan gebi ahaanba Geeska Afrika bilaha $10^{aad}$ ilaa $12^{aad}$ ee Sanadka 2023 ka.**

**22-ka Bisha $8^{aad}$ 2023 Nayroobi, Kenya**: Xarunta IGAD u qaabilsan Saadaasha Hawada waxay ku baaqday in bilaha $10\text{-}12^{aad}$ ee 2023ka la saadaalinayo xaalado ka roob badan sida caadiga ah oo wada saameeya Geeska Afrika intiisa badan. Waxaa xusid mudan, in ay badan tahay itimaalka (>80%) in ay roobab ka badan kuwa caadiga ahi haleeli doonaan koofurta Itoobiya, bariga Kenya iyo koofurta Soomaaliya. Dhanka kale wuxuu itimaalku u badan yahay in xaalado ka roob yar sida caadiga ah lagu arki doono meelo kooban oo ka mid ah koofur-galbeed Ugaandha iyo koofurta galbeed ee Suudaanta Koofureed..

Maaddaama ay roobab laxaad lahaa ay gobolka intiisa badan ka da'een intii u dhaxaysay bilihii $3^{aad}$ iyo $5^{aad}$ roobab dheeraad ahoo misna da'a bilaha $10^{aad}$ ilaa $12^{aad}$ ee 2023-ka, waxay keeni karaan daadad.

Dr Guuleed Cartan, Maareeyaha ICPAC, wuxuu yiri: "*Hadda waxaynu galnay xaaladihii Elnino oo Bariga Afrika ka ah xaalado roobab badan ay da'aan bilaha 10,11 iyo $12^{aad}$. Ka dib markii la soo maray 3 sano oo abaaro xaalufiyay deegaanka, tan waxaa loo arki karaa in beeralaydu heshay naxariis, laakiin waxay durbadiiba isu rogi kartaa inkaar sida in ayax ka kaco qaybo kamid ah gobolka. Ayuxu waxa uu kusii badanayaa fara ba'ana ku hayaa qaybo kamid ah gobolka**.

*ama dhibaatooyinka dhimashada wataa sii bataan Dhammaanteen waynu wada xasuusannaa Elnino 2015/16-kii oo fatahaadihii ka yimid roobab laxaad leh ay sababeen qardun* (andslide), *daadad xoog leh iyo inay dhismayaal ku dumaan. Waxaa lagula talinayaa dowladaha iyo hay'adaha maaraynta musiibooyinku inay ku dhaqaaqaan inay qaadaan tallaabooyinka loo baahan yahay si loo badbaadiyo naf iyo maal"*

Dr Xuseen Siciid, Khabiirka Cimilo Celcelinta ee ICPAC, wuxuu raaciyey: *"El Niño waa dhacdo cimilo oo lagu yaqaan in si* ***kalle*** *ah u kululaadaan biyaha dusha sare ee badweynta Baasifik qaybaha bartammaha iyo bariga ah. Saamaynteedun waxay wax ka beddeli kartaa astaamaha cimilo gooreedyada dunida.. Dhacdo kale oo jirta loona yaqaan (Indian Ocean Dipole), waa marka sakxadda Bedweynta Hindiya, Bariga iyo Galbeedka ay qaybteedna kululaanayso qaybteedna qaboobeyso, ayaa iyana xoojin doonta waxyeellada El Niño."*

Bilaha $10^{aad}$ ilaa $12^{aad}$ waa xilli roobaad muhiim ah, gaar ahaan dhulalka uu maro dhulbarahu ee Geeska Afrika, taasoo laga helo 20-70% wadarta xaddiroobaadka sanadka.. Xilli roobaadka waxay u egtahay inuu goor hore billaaban doono qeybo ka mid ah gobolka oo la filayo inay saami-roobaad sarreeya heli doonaan. (Bariga Kenya, koofurta Soomaaliya, iyo bariga Tansaaniya). Sidaa lidkeeda, waxaa itimaalku u badan yahay roobab dhexdhexaad ah ama dib u dhaca in ay heli doonaan qaybo ka mid ah waqooyiga Soomaaliya, galbeedka Kenya, Ugaandha, koofurta Suudaanta Koofureed, Ruwaandha, Burundi iyo waqooyi galbeed Tansaaniya.

ICPAC waa Xarun ay Ururka Cilmiga Gibilka ee Dunidu (World Meteorological Organization) u wakiilatay Cimilada Gobolka Bariga Afrika. Saadaasheeda xilliyadu waxay ku salaysan tahay faaqidaad xeeldheer oo lagu sameeyo macluumaadka soo jireenka ah, calaamadaha cimilada ee ugu badan, iyo farsamooyin casri ah ee lagu sameeyo is barbar-dhigga xogaha. Xagga bilahan $10^{aad}$ ilaa $12^{aad}$ ee 2023-da, saadaaasha heerkulka la isu keenay ee sagaal xarumood oo caalami ah (Global Producing Centers -

GPCs) waxay muujinaysaa inay itimaal badani jirto oo diirrimaad ka badan sida caadiga ah ka jiro dhulka inta badan Geeska Afrika, gaar ahaa Jabbuuti, Eritreeya, waqooiyga Itoobiya, waqooyiga Soomaaliya iyo dhulka xeebaha Tansaaniya.

-Dhammaad-

Faallo ku wajahan tafaftireyaasha:

Madasha 65aad ee Cimilada Geeska Afrika (The 65th Greater Horn of Africa Climate Outlook Forum -GHACOF65) waxaa u qabtay qaab iskudhafan 22kii Bisha Siddeedaad 2023ka ICPAC (IGAD Climate Prediction and Applications Centre) iyagoo kaashanaya Adeegyada Qaran ee Cilmiga Gibilka iyo Biyaha (National Meteorological and Hydrological Services) ee gobolka iyo hay'ado kale si loo soo saaro Saadaal Xilliyeedka Oktoobar-Diseembar 2023. Madashu waxay kulmisay adeeg-bixiyeyaal cimilo iyo ka faa'iidaystayaal ka kala socda waaxaha dhaqan-dhaqaale, hay'ado dowli ah iyo kuwo aan dowli ahayn, go'aan gaarayaasha, saynisyahanno cimilo, bulshada rayadka ah iyo qaar kaleba, iyagoo ka hadlay saamaynta iyo tallaabooyinka u tabaabushaysiga xilliga foodda inagu soo haya.

Waxaan ku boorrinaynaa saxaafadda iyo ka faa'iidaystayaasha xogaha cimilada in ay booqdaaan boggeenna warbiximaha toddobaadlaha iyo billaha ah ee xilli-roobaadka la saadaalinayo: www.icpac.net-

Xogta oo kooban, lana jilciyay, fadlan la xiriir Adeegyada Qaran ee Cilmiga Cimilada iyo Roobabka (National Meteorological and Hydrological Services).

Xogta farsamada xilli roobaadka, Oktoboer, Nofeembar iyo December ee ICPAC.

*War saxaafadeedka IGAD ee iska weecinta khataraha iyo maareynta cayayaanka xuduudaha isu mara (Agoosto, 2023).

Waraysi saxaafadeedyada iyo wixii codsiyo ah, fadlan la xiriir:

**Nicolas Bellet:** +254 110428270 nicolas.bellet@igad.int

**Emebet Jigssa:** +254 748108077 emebet.jigssa@igad.int

**Paula Machio:** +254 746511941 paula.machio@igad.int